



## Soo koobid

Dalka Mareykanku wuxuu Iran u aqoonsaday “ Dawlad Kafaalad-qaadda Argagixisada” sannadkii 1984 tii, lagasoo bilaabo xilligaasna, Iran waxay dadaal firfircooni ku jirto u gashay ama ugu jirtay inay horkacdo kharribaad fara badan iyo falal lagu dhintay oo ka dhan ah dalka Mareykanka iyo shacabkiisa meel walba adduunka dacalladiisa.

Dalka Mareykanku wuxuu u aqoonsaday Ilaalada Ciidamada Kacaanka Islaamiga ee Iran (IRGC), inay yihiin Urur Argagixiso Shisheeye ah bishii Abriil 15keeda, 2019, kaalintii tooska ahayd ee ay ku lahayd shirqoolada argagixiso

## Mudada

**Lasoo saaray:** Janaayo 04, 2020 05:15 pm ET

**Dhamaanaya:** Janaayo 18, 2020 01:00 pm ET

## Faahfaahinta

- Janaayo 2deeda, 2020, dalka Mareykanku wuxuu qaaday weerar lagu khaarijiyay
- Taliyihii Ciidamada IRGC-Quds Qassem Soleimani inta uu joogay Soleimani dalka Iraq.
- Hogaamiyayaasha Iran iyo kooxo xiriir la leh iyo ururo kale oo xagjir ah ayaa si cad u sheegay damacooda ah inay ka aargoostaan dalka Mareykanka.
- Waqtigan xaadirka ah, ma hayno xog si cad umuujinaysa, khatar lagu kalsoonaan karo oo ku aadan dalkan. Iran iyo xulafadeeda, sida Hizballah, ayaa horey u muujiyay rabitaankooda and awoodooda inay ka fuliyaan falal dalka Mareykanka.
- Shirqooladii horey looga fuliyay dalka hooyo waxaa ka mid ahaa, iyo waxyaabo kale, indha-indhaynta iyo qoorshaynta lagu bartilmaameedsanayo kaabayaasha iyo weerarka Saybarka oo lagu aadinayo bartilmaameedyo dalka Mareykanka gudhiisa ah.
- Iran waxay leedahay barnaamij wayn oo Saybarka ah oo weerar ka dhan ah dalka Mareykanka ku fulin karto. Iran waxay leedahay awood, markay ugu yartahay, fulinta weeraro kharibaad si kumeel gaadh ah ay u waxyeelaynayso kaabayaasha muhimka ah ee dalka Mareykanka.
- Iran waxay u badan tahay inay u aragto falalka argagixiso mid ay ku hor istaagayso ama ay kaga aargoosanayso dadka ay u aragto cadowgeeda. Marar badan, Iran waxay bartilmaameedsatay Mareykanka danihiisa iyadoo adeegsatay lammaanayaasheeda sida Hizballah oo kale.
- Kooxaha xagjirka ah dalka gudhiisa ee rabshada wata ayaa ka faaiideysan kara inay bilaabaan weeraro shakhsi-shakhsi ah.
- Weerarka dalka Hooyo wuxuu imaan karaa digniin yar ama digniin la'aanba.
- Waaxda Amniga Waddanka waxay is dhaw ula shaqeynaysaa dawladda Federaalka, Gobolka, Degmada, iyo laamaha madaxa banaan sidii loo ogaan lahaa laysagana difaaci lahaa hanjabaadyada Waddanka, iyo in kor loo qaado sugidda tallaabooyinka amniga haddii loo baahdo.

## Noocyada Talobixinada

### Faafinta

Wuxuu sharaxaa waxa hadda soo kordhaya ama isbadalka guud ee la xiriira hanjabaadaha argagixisada.



## Digniin Kor-looqaaday

Waa digniin lagu kalsoon yahay oo ah hanjabaad argagixiso ka dhan ah dalka Mareykanka.

## Khatar Dhaw

Waa digniin lagu kalsoon yahay, oo caddeyn wadata iyo argagax iyo hanjabaad soo socota oo ka dhan dalka Mareykanka.

## Sideed uga gacangaysan kartaa

- Usoo sheeg dhaqdhaqaaqyada tuhunka wata ciidamada sharci fulinta oo ah kuwa ugu munaasibsana inay ku siiyaan talooyinka caddeynaya tilmaamaha argagixisada. Usoo sheeg dhaqdhaqaaqyada tuhunka wata ama xogaha khataraha leh, ooy ka mid yihiin falalka khadka internetka, hay'adda [Fusion Centers](#) iyo [Xafiisyada FBI](#)- ka tirsan [Ololaha dalka oo dhan ee lagusoo gudbin wixii laga shakiyo](#).
- Baro [Sida loo ogaado astaamaha lagu garto qorshayaasha hore](#) ee la xiriira argagixisada iyo falalka dambiyeed oo kale.

## Diyaar garow

- U diyaar garow carqaladdaha Saybarka, Emailada tuhunka leh, iyo Shabakadaha dib u dhacaya.
- Masuul ka noqo amnigaaga shakhsiyadeed. Ogsoonow meelaha bixitaanka deg degga ah iyo goobaha ay ku sugan yihiin shaqaalaha amniga. Wado xiriirka telefoonka deg degga ah iyo macluumaadka baahida gaarka ah.
- Hirgali dhaqanka nadaafadda Saybarka asaasiga ah sida kaydinta xogaha iyo ka shaqeynta habsiino xaqiijin fara badan. Xog dheeri ah ku booqo [CISA.gov](#).
- [Isku xir, Qoorshee, Tababar, iyo warbixin](#) si aad ugu diyaar garayso ganacsigaaga & shaqaalaha. Qalabka Amniga/khayraadka waxaa laga heli karaa marka la galo bogga DHS ee [Ololaha Amniga Magaalada](#).

## La soco

- Dawladda Mareykanku waxay bixin doonaa xogaha siyaadada ah oo ku saabsan wixii khataro soo kordha sida macluumaad dheeri ah oo la aqoonsado. Dadweynaha waxaa lagu dhiirigalinayaa inay dhagaystaan ciidamada sharci fulinta ee dawladda hoose iyo saraakiisha nabadgalyada dadweynaha.
- Waxaan ku boorinaynaa dadka Mareykanka ah inay safarkooda wataan, ka qayb galaan xafladaha guud ee dadweynaha, ooy si furan isu kaashadaan dadka kale balse ay ka feejignaadan lana socdan hareerahooda.
- Wasaaradda Arrimaha Dibaddu waxay soo saartaa [digniinaha iyo taxadarka safarada caalamiga ah](#).
- Xogaha dheeriga ah ku booqo boggan [Ready.gov](#).



Talobixinta Qaran ee Tabaha Argagixisada

# Faafinta

[www.dhs.gov/advisories](http://www.dhs.gov/advisories)

Taariikhda lasoo saaray: Sabti, Janaayo 04, 2020

---

**Haddii aad wax aragto , Wax Sheeg™.**

**Usoo sheeg dhaqdhaqaaqa tuhunka leh hay'adaha sharci fulinta ama wac 911.**

Talobixinta Qaran ee Qaabka Argagixsadu waxay dadka Mareykanka ah siinaysaa macluumaad feejignaan leh oo ku saabsan khataraha Amniga Waddankooda. Macluumaad dheeri ah waxaa laga helayaa [www.dhs.gov/advisories](http://www.dhs.gov/advisories). Moobaylkaaga ku hel waxa soo kordha: [twitter.com/dhsgov](https://twitter.com/dhsgov)

*Haddii aad wax aragto , Wax Sheeg™. Waxaa ogolanshaha isticmaalka erayadaas bixiyay Hay'adda Gaadiidka Magaaloyinka Waaweyn ee NY.*